

Ilmahayga caawimaad dheeraad ah ma laga siinayaa imtixaannada?

Caruurta ay waxbarashadu si gaar ah ugu adagtaahay waxaa laga yaabaa inay xaq u leeyihiin in imtixaanka waxyaabo dheeraad ah la siiyo, sida imtixaannada heerka muhiimka ah (SATS) ama koorsooyinka GCSE/ A levels.

Caadin waqti dheeraad ah ayaa la siiyaa, ama ka caawin aqrinta su'aalaha iyada oo hadba ku xidhan baahida ilmahaada. Caawimaadda noocan ah waxaa loo yaqaanaa habaynta galidda.

Habaynta galidda ee gaarka ah waxaa loo baahanyahay in la sii diyaariyo imtixaanka ka hor, marka la hadal SENCO-ga ilmahaada si aad u ogaato waxa ay taageero siin karaan.



Ma jiraan kooxo taageero oo aan kula kulmi karo waalidiin kale oo arrintan ila qaba?

Iskuullada iyo Dowladaha Hoose ayaa xiriir la leh kooxo taageero oo ay kugu xiri karaan, ka dalbo maclinkaada taageero.

Waxaa jira shabakado kala duwan oo taageera waaliddiinta leh caruur ay waxbarashadu ku adag tahay, arag xiriirraadana.



Xiriirro

Xog ku saabsan hab dhaqan wanaagsan iyo taageerada caruurta iyo da' yarta qaba Disleksiyada:

The Dyslexia-SpLD Trust
01344 381 564 ama info@thedyslexia-spldtrust.org.uk

www.interventionsforliteracy.org.uk
www.thedyslexia-spldtrust.org.uk

Xarunta Disleksiyada ee Helen Arkell
01252 792 400 ama enquiries@arkellcentre.org.uk
www.arkellcentre.org.uk

Kooxaha deegaanka ee taageeridda iyo la talinta:

Jamciyadda Biritishka ee Disleksiyada
Helpline 0845 251 9002 ama helpline@bdadyslexia.org.uk
www.bdadyslexia.org.uk

iyo

Dyslexia Action
01784 222 300 ama info@dyslexiaaction.org.uk
www.dyslexiaaction.org.uk



British Dyslexia Association

Helen Arkell
Dyslexia Centre

Springboard

Dyslexia Action

Assessment - Education - Training

patoss

X
xtraordinary people

The
Dyslexia-SpLD
Trust

Su'aalaha ku saabsan dyslexia?



British Dyslexia Association

Dyslexia Action
Assessment - Education - Training

Helen Arkell
Dyslexia Centre

patoss

Springboard

X
xtraordinary people

Waa maxay disleksiya?

Disleksiya hadda si fiican ayaa loo fahamsanayahay, laakiin wali way jaha wareerin kartaa dadka ay ku dhacdo.

Disleksiya sida badan waxay saamaysaa barashada xirfadaha aqrinta iyo higgaadinta. Caruurta ay hayso Disleksiya waxaa ku adkaado isticmaalka foonikiska si ay erayada usoo saaraan; waxaa ku adag kala googoynta dhawaaqa erayada sida badanna waxaa ku adkaada xasuusashada wax lagu hadlay, sida waxa la faro oo kale.

Caruur badan oo qaba Disleksiya ayaa sidoo kale mashaakil ka haystaa isla socodsiinta xibnaha ama shaqada xisaabeed ama aruursanaanta iyo ahmiyad siinta. Mashaakilkann ka mid ma aha Disleksiya, laakiin waxay ka qayb qaadan karaan inay ka dhigaan Disleksiya mid ay adagtahay wax ka qabshadiisa.

Disleksiya waa mashaakilka waxbarasho midka ugu badan oo waxay si ba'an u saamaysaa in ku dhowdhow 10% dadka oo dhan. Dad badan oo ay hayso Disleksiya aan aad u buurnayn ayaa iskuulka guul ka gaadhay iyaga oona jirin wax caawimaad ah oo dheeraad ah oo ay heleen. Dadka ay hayso midda aadka u daran waxay u baahanayaan taageero joogto ah inta ay iskuulka ku jiraan.



Sideen ku garanaayaa in ilmahayga laga yaabo inuu leeyahay Disleksiya?

Sida badan calaamadaha ugu horreeya ee Disleksiya waxay u muuqdaan sidii mashaakil barasho aqris, qoraal, ama higgaad. Laakiin mashaakilkann waxaa keeni karo maql ama arag xumo ama nooca waxbaridda. Haddii meesha laga saari karo arrimahan kale oo ay dhibaataadiina sii socoto markaa Disleksiya ayay noqonaysaa sababta ugu dhow ee keenaysa dhibaatooyannan adkaanta barashada aqriska, qoraalka iyo higgaadda.

Disleksiya waxay sida badan ku timaaddaa hiddo; haddii ay jirto taariikh higgaadin xumo ama barashada aqriska, waxay u dhowdahay in ilmaha mashaakilka haystaa ay la xidhiidho Disleksiya.

Waxaa jiro calaamdo hore oo lagu garan karo Disleksiya xitaa ka hor inta aan la billaabin wax aqrinta rasmiga ah ee iskuulka. Waxaa ka mid ah calaamadahan: ina ku adagtahay ilmaha hooriska; magacyada waxyaabaha oo iskaga qasmo; ku adkaasho barashada ku dhawaaqa (ama magacyada) xurrufka alif baa'da.

Markuu cabbuur iskuulka ilmaha dhigto ka dib, calaamadaha laga fiiriyo waxaa ka mid ah ku dhibaato xasuusashada waxa la faro iyo guud ahaan inuu u ekaado inuu illowsho badanyahay nolol maalmeedkiisa; ku dhibaato xasuusashada magaca saxda ah ee waxyaabaha iyo dadka; hubid la'aan xarakaynta erayada dhaadheer ku dhibaato u kala jabinta erayada unugyo yaryar oo dhawaaq.



Maxaan sameeyaa haddaan u malaynayo inuu ilmahayga leeyahay disleksiya?

Waxa ugu horreeya ee aad samaynayo waa inaad la hadasho ilmahaada macallinkiisa. Dugisyada hoose ee waayahan baridda aqrinta ee hore ee uu ilmo kasta helo waa mid ku habboon caruurta leh Disleksiya. Hase ahaatee macallimiintu waxbay ka baddali karaan barnaamijka kuna dari karaan haddii uu jiro walwal – waxaa laga yaabaa inaad ogaato inay horayba u samaynayaan arrintan. Iskuullada waxay sidoo kale u heli karaan caruurta dib u dhacdo barnaamijyo dheeraad ah.

Haddii aad wali walwasantahay ama ilmahaada uusan horay u soconin, markaa ballan la samayso Iskuduwaha Baahiyaha Waxbarasho ee Gaarka ah (SENCO) ama madaxa iskuulka si aad ogala hadasho wixii khiyaarro kale jira, oo ay ka mid tahay qiimaynta.

Ilmahayga ma baran doonaa aqriska, qoraalka iyo higgaadda?

Hadday helaan taageero ku habboon, ilmaha disleksiya qaba sida caadiga ah way karaan inay wax aqriyaan, qoraan oo ay higgaadiyaan; in kasta oo ay waqti ka dheer kuwa kale ku qaadanayso.

Tiknooloojiyada wax caawisa sida telefoonada xariifyada ah iyo kumbuyuutarrda gacanta ayaa caruur badan oo disleksiya leh ku caawiyay inay si wax ku oo ah u xiriiraan.

Sideen ku ogaan karaa inuu ilmahaygu disleksiya qabo?

Dugisyada waayahan waxay sameeyeen imitixaanno degdeg ah oo sahal ah oo ay ku dabagalaan horusocodka ilmaha kuna ogaadaan calaamadaha hore ee Disleksiya. Haddii ay jiraan calaamado tilmaamaya inay jiri karto Disleksiya oo aan horumar wanaagsanna uusan suuro galin, waxaa la smayn karaa qiimaynta uu iskuulka ku samaynayo macallin aqoon gaar ah u leh ama aqoonyahanka cilmi nafsiga waxbarasho.

Qiimayntan waxay sawir ka bixinaysaa meelahaada ku ficanyahay iyo meelaha uu ku xunyahay, iyo waliba talooyin.

